



WAR-MURTIYEED

16th-17th February 2022

Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada Dawladda Federaalka ah ee Soomaaliya oo kaashaneysa Saaxiibbada Caawiya ayaa abaabushay Shirka shaqa abuurka Qaranka oo lagu qabtay Magaalada Muqdisho intii u dhaxeysay 16-17 ka February 2022 kaa oo ay ka soo qeyb galeen Wakiillo ka kala socday Dawladda Federalka ah, Dawladaha Xubaha ka ah Dawladda Federaalka, Hay'adaha Maxalliga ah iyo kuwa caalamiga ah, Shaqa bixiya yaasha dalka, Xiriirka Shaqaalaha, Ururrada Bulshada, Xarrumaha Tababarada iyo Jaamacadaha, si looga arrinsado Arrimaha la xiriira Shaqa Abuurka Dhallinyarada Soomaaliyeed. Shirka ayaa diiradda saaray Caqabadaha Suuqa Shaqada iyo Xogaha la xiriira, Helitaanka Fursado Maalgelineed si loo dhiirri geliyo Hal Abuurayaasha Ganacsiga, Tayada iyo helitaanka Waxbarasho iyo Xirfado shaqo iyo sida ugu habboon ee loo gaari karo Horumar Dhaqan-Dhaqaale oo la joogteyn karo.

Shirka oo Socday muddo laba Maalin ah ayaa ka qeyb galayaashu si mug leh u gorfeyeen dhammaan cinwaannada Muhiimka ah ee xal u raadinta Caqabadaha Dhaqan-Dhaqaale ee ay sababtay Shaqa la'aanta dalka ka jirta.

Dood dheer ka dib ka soo qeybgalayaasha Shirka ayaa isku raacay:

- 1-In Soomaaliya Wajaheyso Caqabado badan oo ay ugu waaweynyihiin Abaaraha, Shaqa la'aanta baahsan, cunto yari, jahli, faqri iyo halis caafimaad oo baahsan maaddaama Dalku weli la tacalayo Caqabadaha COVID-19
- 2-In Shaqa la'aanta Dalka ka jirta iyo Faqrigu yahay sababta ugu weyn ee Xasillooni darada Amni iyo Caqabadaha ku gudban Hormarinta Dhaqan Dhaqaale ee Dalka Soomaaliya. Waxaan ku heshiinay in sida ugu fudud ee loola tacaali karo Xasillooni darida amni ee dalka ka jirta ay tahay bixinta xirfado shaqo oo wax ku ool ah, fursado maalgelineed oo Dhalliyarad dalkeenu ka faa'ideysato si ay u abuurtaan shaqo si iskood ah.
- 3-Si loo gaaro xal u helida Shaqa la'aanta waxaa la isku raacay inay muhiimad gaar ah u leedahay hirgelinta iyo horumarinta qaab-dhismeedka Siyaasadda Qaran ee Shaqa Abuurka
- 4-In takoorka, heyb sooca iyo faquuq nuuc walba oo uu yahay aan loo dulqaadan Karin lana joogo waqtigaa awoodda la isugu geyn lahaa in la ciribtiro nuucyada takoorka ee hadda jira. Shirku wuxuu isku raacay in Dawladda Federalka ah, Dawlad Gobolleedyada, Hay'adaha Caalamiga iyo kuwa maxalliga ah, Shirkadaha Gaarka loo leeyahay, Xarrumaha Waxbarashada iyo ogaaleyda kale ay qaadaan talaabooyin wax ku ool ah oo lagula dagaalamayo faquuqa Bulshada Dhexdeeda ah. Sidoo kale Kasoo qeyb galayaashu wax ay isku raaceen in la sameeyo wacyi gelin guud iyo olole looga soo horjeedo dhammaan nuucyada Takoorka ee Bulshada Soomaaliyeed ka dhex jira.

5- In Hannaanka lacagaha wareega yahay sida ugu habboon ee lagu dhiirri gelin karo Hal-abuurayaasha Ganacsi ee Dalka laguna yareyn karo Shaqa la'aanta iyo Faqriga Dalka ka jira. Waxaan isla qaadanay in Mashruuca KOBAC noqdo salladda Maalgelinta Halabuurka Soomaaliyeed ay tahayna in Dhammaan Saaxiibbada Soomaaliya la shaqeeyaan Dawladda Federalka si loo hirgeliyo ahdaafta waaweyn ee Mashruucani higsanayo.

6- In si wada jir ah looga shaqeeyo sidii Soomaaliya ku heli laheyd Maalgelin wax tar leh isla markaana sare loogu qaadi lahaa in si wanaagsan loola dhaqmo Shaqaalaha iyadoo loo marayo halbeegyada Caalamiga ah iyo Xeerarka Qaran ee la xiriira Ilaalinta Xuquuqda Shaqaalaha. Si loo gaaro yoolkan waxaan isla garanay in lagu dadaalo helitaanka Shaqo Sharfan oo u qalanta Shaqa doonka Soomaaliyeed iyadoo loo maraayo ansixinta iyo meel marinta Heykalka Shaqo Sharfan iyo halbeegyada kale ee Caalamiga ah

7- In la sameeyo Sanduuqa Qaran ee Shaqa Abuurka oo ay qeyb ka yihiin Ganacsiga gaarka looleeyahay, Hay'adaha Caalamiga ah iyo Kuwa Maxalliga ah si sare loogu qaado iskaashiga wada shaqeyneed ee ka dhaxeeya loona gaaro yoolka fog ee Abuuritaanka Shaqo Sharfan oo Muwaadiniinta Soomaaliyeed ka Faa'ideystaan.

8- In la daah-rogo Fursadaha iyo Kheyraadka la heli karo si loo taageero yagleelidda iskaashi buuxa oo u gogol xaara hannaan dhaqaale oo loo simanyahay loona xalliyo caqabadaha ka dhaca goobaha Shaqada.

9- In la dejiyo Hannaan isu dheelitiran oo bixiya adeeg Tababar iyo Xirfado Shaqo iyadoo loo marayo hannaanka Carbinta Shaqada, Meeleynta iyo Shaqa barista taasoo caawin doonta dhallinyarada iyo guud ahaan Shaqa doonka Soomaaliyeed.

10- In la abuurto Guddi howleedka Qaran ee Maareynta Xirfadaha Shaqada iyo Farsamada Gacanta oo Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada JFS Hoggaamiso kaa oo la shaqeeya Guddiyada Horumarinta Dhaqaalaha, Shaqa Abuur iyo midka ilaalinta Bulshada.

11- Shirku wuxuu Bankiga Dhexe iyo Bankiyada gaarka looleeyahay ugu baaqayaa in ay sameeyaan hannaan fududeeya maal gelinta hal-abuurka Muwaadiniinta iyo ganacsiyada yar yar ee dalka ka jira.

12- Shirku wuxuu isku raacay in Dadka Baahiyaha Gaarka ah qaba Kaalin muhiim ah laga siiyo Dhamaan fursadaha Shaqada, Waxbarashada, Xirfadaha iyo kuwa maalgelineed ee Dalka ka jira.

Dhamaad